Ilmadii Aabbahay

Aabbahay waa nin aad u furfuran, dabeecad wanaagsan, kaftan iyo qosol badan, qaraabada iyo dadka deegaanku ay aad u jecel yihiin.

Waa nin gacan furan xagga bixinta; masaakiinta u leh gacan dhiib qurxoon, masaajidka ku xiran, Quraan akhris badan, xishood badan oo afgaaban.

Deeqaay, aabbahaa waa nin si wanaagsan idiin tarbiyeeyay. Aabbe kaliya idiinma ahan ee xitaa waxaa uu idiin yahay saaxiib qiima badan, heer ay gaarto kalsoonida aad isaga ku qabtaan inaad wax walbaa u sheegataan. Waa aabbe kaftan badan, naxariis dheeraad ah u muujiya carruurtiisa.

Aabbahaa markaad u fiirsato sida uu ula dhaqmayo carruurtiisa, gaar ahaan uu gabdhaha u qiimeynayo, waxaad dareemaysaa aabbaha dunida ugu qaalisan in uu yahay. Maad hooyadiin sidaan oo kale u soo hareer fariisataan! Aabbihiin waxaad gaarsiiseen heer uu fursad u waayo waqti uu wax ku cuno ama uu nasiino ku qaato. Bal fiiri, midkaa yar ee sijaayadda la ordaya, fiiri wiilka aabbe qoortiisa ku dhaggan ee leh: qaabkee loo sameeyay mucjisadan! Bal fiiri, midda da` saddexaadda reerka ah ee buuqa carruurta kale aamusinaysa ee ku haysa ama ku faanaysaa maanta: aniga kaliya ayaa xisaabtii fasalka ka shaqeeyay.

Hooyo Xaadsan dhinac ayey ka soo qaylineysaa. Aabbihiin ayay ku leedahay: “Markaad timaaddo, guriga dhan wuu isla kacayaa. Ilmahaan iska canaano, sidii waayeel lixdan jir ku curtay ilmaha ha u jilicsanaane. War xishooda, deriska yuusan idinla yaabine.”

Bal fiiri, adeer Axmedka dariskiinna ah sida arxandarrada ah uu carruurtiisa u garaacayo,

ugu qaylinayo habeen iyo maalin! Meel ma lagu sheegaa ama ma maqashay cid sheeggiisa haysa wiilkiisa Mahad ee garaacistii uu aabbihiis garaacay guriga uga maqan, xitaa aan nolol iyo geeri lagu hayn.

Deeqaay, waxaad dhibsataa adduunkana aad u neceb tahay in aabbahaa uu xaaladdaada hoose ku weyddiiyo iyo wiilka telefoonkan sida joogtada ah kaaga soo wacaya. Haa, waan ku aqaannaa, Ilaahay ayaa dabcigaba kaa qaaday oo caqli iyo xikmad aad aabbahaa kula sheekaysato ayaadanba hayn. Maxaad u diidaysaa waa runtiise; ragga isagaa kaa yaqaan, kan

kuu qalma ee noloshaada anfacaya haddiiba uu kuu tilmaamayo maad ka dhegaysatid? Ma isagaa kugu yiri: nin iima keeni kartid? Markaad kala dhuumanayso, kaad adigu soo arkatay!

Aabbihii aad ku ooyn jirtay, kana daba carari jirtay, waxaad doonto aad weyddiisan jirtay, hadiyadaha qaaliga ah kuu keeni jiray, marka iskuulka aad kaalmaha hore ka gasho, si gaara kuu abaalmarin jiray, miyaa bahal noqday oo markaad hanaqaad noqotay iska beddelay qofkii uu ahaa?

Marka uu idinku soo hadalqaado nimanka noocyadooda iyo beenta ay gabdhaha ku sasabaan, si uu idin kaga digo, maxaad la carartaa oo aad goobtaba uga kacdaa?

Ma waxay kula ahaatay afkaba haddii uu aabbahaa kala qaado, si uu idiin waaniyo in waranku xaggaada ku soo jeedo? Maalinna ma arki weyday naxariista iyo kalsoonida uu wax walba idiinku sheegayo, ragga kuwooda xunna uu idiinka digayo?

Deeqaay, ma waxaad qarinaysaa iimo iyo dhaliilo aad ku ogtahay saxiibkaa Saleebaan oo aad indho isaga maahee caqli kaleba aadan lahayn?

Xitaa, maalinna ma garan weyday talooyinka aabbahaa in aad dhegaysatid, oo aad u fiirsatid sifahaas uu ragga ka sheegayo in uu saaxiibkaa leeyahay oo aad hadhow xitaa kala talin karto in uu dabeecadaha qaar iska beddelo.

Saaxiibkaa Saleebaan si joogta ah ayuu kuula soo hadlaa, hadalkaadana kama caajiso jacayl waalli ah ayaad adna u haysaa. La iskumana diidana qiimaha iyo wanaagga uu jacaylku leeyahay qofka uu galana waa la yaqaan dad iyo duunyaba meeshuu ka dego.

Deeqaay, yaa ku yiri oo kuu sheegay, qofka uu jacaylku galo noloshiisa waxba ma qabsan karo. Maskaxdaada ma ku laabatay oo ma is weyddiisay saddex qalad oo ay noloshaadu sii galayso.

Midda koowaad kulamadaan joogtada ah ee Saleebaan aad la samayneyso Jaamacaddaadiina aad uga habsaamayso waxa ka imaan kara, maalinna ma ka fakartay?

Dhafarkaan joogtada ah oo aad habeenkii telefoonka kor ugu haysid caafimaadkaada iyo waxbarashadaada saamaynta uu ku yeelan karana ma ka fakartay?

Khiyaanadaan aad reerkaada ku samaynayso, oo adigoo jaamacad lagugu ogaa aad dhex ka leexanaysid, oo nin aan ku qabinna aad u tagaysid, musiibada ka dhalan karta maalinna ma ka fakartay?

Haa, naag lee tahay waxbarashadaada jikaa u dambaysaa warkii ahaa ee nacaska uu soo hindisay miyaa qalbiga kaa galay.

Maalinna kuma fakarin gabdhahan heerka nolosha iyo waxbarashada ka gaaray ee magaca iyo maalka adduunyada ka sameeyay. Marna waad arki weyday, sow maaha?

Hadda, xaalka wuu kugu adkaaday calooshaadana wax baa galay. Farxaddii badneyd ma haysatid? Aabbahaa wajiga ma siin kartid oo reerkaada waxaan uma sheegan kartid ee maxaa xal kuu ah? Saleebaan xisaabta ka saar, waayo waad ogtahay in uusan waxba haysan, isagaba uu eeddadii korsaar ku yahay waalidna aysan magaalada u joogin oo hooyadii iyo aabbihii labaduba ay miyi jiraan.

Ma xalkii uu kuu sheegayey ee ahaa in uu baadiyaha kuula dhuumanayo ayaad maanta ka fursan weyday? Dantu maantay waxay ku badday in aad gaari baadiyaha aadaya dusha sare ka raacdid oo aad ka tagtid magaaladii aad ku soo barbaartay oo ay joogeen reerkaadii quruxda badnaa iyo asxaabtaadii qiimaha badnaa? Si uusan canugga wax kaaga gaarin gawaarida yaryar ee raaxada ee baadiyaha aadda xitaa, saxiibkaa ma kuu kirayn kari waayay oo maku saari waayey! Deeqaay, adduun ba`ay ayaad lugahaada ku doonatay maantase way ku haysataa, waxba ha welwelin wax walba adaa is yeelay oo taladii iyo waanadii aabbahaa raaci waayey. Maan iska dhinto maxaad u lahayd maad hadda gaariga iska tuurtid? Muxuu saxiibkaa kaaga aamusan yahay? Ma kuu sheekeeyoo? Mise telefoonka uu sitaa qofka uu kala hadlayo ayaa kaa qiima badan?

Iska daa walbahaarka, murugada badanna waxba kuuma tarayso. Waa la joogaa halkaad rabteene kabbiinka qabso oo gaariga ka soo dag. Marna ha sugin Saleebaan in uu gacanta kaa qabtaa, waa kaa goor hore gaariga ka booday ee bacdaadii buluugga ahayd kuugu sida labadii baati ee aad guriga kala soo baxsatay.

Waxba ha ka welwelin nooca reerka aad u tegi doontid, laakiin xusuuso aabbahaa murugadiisa iyo marka uu ku waayo sida uu noqonayo.

Iska ilaali oodda, yaysan dharka kaa qabsane ninkaas geeska jira salaan, waa Saleebaan aabbihiis e, hana illoobin in aadan mehersanayn oo reerka u sheeg in canugga uu uurkaada gelay meher la`aan……

W.Q. Cabdulqaadir Cabdi (Jubba)